

Fariintani waxaa dhawaan iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo galin doonaa :
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 25, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ilaha loogu talagalay Kulaylka Xad dhaafka ah



Oregon Health Authority graphic

Sida laga soo xigtay Waaxda Adeega Cimilada Qaranka, qaybo badan oo ka mid ah Oregon ayaa la filayaa in ay gaaraan heerkul jabiyay rikoorka, iyada oo meelaha sare uu gaarayo heerar halis ah inta lagu jiro toddobaadka dhammaadkiisa oo ay ku jiraan mid gaaraya ilaa 107 degaanka Portland; ilaa 112 koonfurta dhexe iyo koonfur galbeed ee Oregon; iyo ilaa 104 bartamaha iyo bariga Oregon.

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa doonaya in uu xaqiijiyo in dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo qoysaskoodu ay badbaado qabaan inta lagu jiro waqtigani. Hay'adaha Maamullka Kiiska (CME) iyo daryeel bixiyayaashu waa in hubiyaan shakhsiyaadka ka tirsan adeegyadan

oo xaqiijiyaan in ay dadku badbaado iyo kalsooni qabaan, haddii kale, ka caawiyaan qofka in uu gaaro xarun la isku qaboojiyo ama goob kale iyadoo la raacayo qorshayaashaada xaalada degdega ah.

Hay'adaha Maamulka Kiisku waa in ay raacaan qorshayaashooda xaalada degdega ah ee la xiriira kuleylka iyo korontada la'aanta imaan karta. CME waa in ay sidoo xiriir la sameeyaan xarumaha hawlgalada xaalada

degdega ah ee degaanka haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Macluumaadka la iskala soo xiriirayo oo loogu talagalay xarunta xaalada degdega ah ee degaanka waxaa laga helayaa [internet-ka](#).

Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed waxay dadka u qaadi karaan xarumaha la isku qaboojiyo oo la joogi karaan iyaga inta ay socoto hawshu, haddii loo baahdo. Tani waxay ka dhignaan kartaa koror ku meel gaar ah oo ku yimaada saacadaha iyo masaafada la socdo. Labadooduba hore ayaa laga sii oggolaaday waxaana lagu oggolaan karaa email ahaan. Gudbi adiga oo sii maraya Dib u eegista Dhaqaalaha ODDS haddii saacadahu dhaafsiisan yihiin waxa ay ansixin karto CME.

Ilaha kale waxaa ka mid ah:

Ka hortaga Jirooyinka La xiriira Kulaylka (OHA):

<https://www.oregon.gov/oha/ph/Preparedness/Prepare/Pages/PrepareForExtremeHeat.aspx>

Kulaylka Xad dhaafka ah (CDC):

<https://www.cdc.gov/disasters/extremeheat/index.html>

Calaamadaha iyo Astaamaha Jirada La xiriirta Kulaylka (CDC):

<https://www.cdc.gov/disasters/extremeheat/warning.html>

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty

Agaasimaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka

aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.